
# HAGAHA KA HADLAYA HABRAACA LOO MARO MAGANGELYADA CAALAMIGA EE IRELAND



# Macluumaadka Annaga Nagu Saabsan

Xafiiska Wakiilka Sare ee Qaramada Midoobay U qaabbilsan Arrimaha Qaxootiga waa hay'adda QM ee u xilsaaran magangelyada dadka lagu qasbo inay kasoo qaxaan guryahooda ee badbaado u raadsada dalalka kale. Xafiiska Qaxootiga UNHCR ee heer qaran ee dalka Ireland wuxuu ka shaqeeyaa hawlaha la xiriira badbaadinta xuquuqda iyo daryeelka qaxootiga, magangalyo-doonayaasha iyo dadka bilaa dowladda ah ee kunool dalka Ireland iyada loo marao bixinta adeeg la xiriira jiheynta, tababbarrada iyo taageero la siiyo laamaha iyo weliba kobcinta halbeeg-qiyaaseedyada ugu wanaagsan ee heer caalami kuwaasoo la xiriira arrimaha shuruucda, siyaasadda guud iyo habraacyada la marayo. Sidoo kale waxaanu mararka qaarkood bixinaa, taageero, kaalmo ama talo-bixin si shakhsi ahaaneed loo siiyo qaxootiga, magangalyo-doonka ama kuwa aan dal lahayn.

Markay taariikhdu ahayd bishii Disambar 2016, waxa dalka Ireland laga dhaqan-geliyey sharci cusub oo loogu magacdaray **Xeerka Magangelyada Caalamiga 2015**. Xeerkani wuxuu dhaqan-gelinayaa habraac cusub oo gaar ah oo loo marayo magangelyada kaasoo la xiriira qiimeynta qaabka dalka Ireland looga hirgelinayo magangelyada caalamiga ah. Buug-yarahan waxaa laga heli karaa xog ku saabsan guudmar ka hadlaya isbaddalada ugu muhiimsan ee lagu sameeyey sharciga cusub iyo nidaamka cusub ee loo marayo magangelyada ee looga gol-leeyahay sidii loo caawin lahaa dadka Ireland ka raadsanaya magangelyo caalami ah iyo kuwa iyaguna la shaqeeya dadka raadsanaya magangelyada.[1]

# Laamaha ku Shaqada Leh Goaaminta

Kuwani waa hay'ado ay khuseyso shaqada la xiriirta qiimeynta qaabka hirgelinta magangelyada caalamiga ah.

### Xafiiska Magangelyada Caalamiga (The International Protection Office, IPO)

Xafiiska Magangelyada Caalamiga (IPO), waa xafiis ka hoos-shaqeeya laanta Jinsiyadda iyo socdaalka ee dalka Ireland (INIS), kaasoo qaabbilsan qiimeynta qaabka hirgelinta magangelyada caalamiga. Madaxbannaanida mas'uuliyiinta xafiiska Magangelyada Caalamiga iyo go'aan-qaadashadooda la xiriirta arrimaha magangelyada caalamiga ah waa mid uu sharciga Ireland damaanaq-qaadayo. Si ay suurtagal u noqoto inaad magangelyo ka dalbatid dalka Ireland gudihiisa, gaar ahaan meel aan ahayn goobtii aad kasoo gashay dalka, waxaa lagaaga baahan yahay inaad si shakhsi ah codsi ugu soo gudbisid Xafiiska Magangelyada Caalamiga. Billowgii sannadkan 2017 waxaa xafiiskan loo badalay Xafiiska Wakiilka Codsiyada Qaxootiga (ORAC). Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah fadlan booqo barta internetka ee ciwaankeedu yahay sidan: **www.ipo.gov.ie**

### Maxkamadda Rafcaanada Magangelyada Caalamiga (The International Protection Appeals Tribunal, IPAT)

Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga (IPAT) waa maxkamad madaxbannaan. Waxay qaabbilsan tahay hubinta rafcaanada ay soo gudbiyaan shakhsiyaadka uu Xafiiska Magangelyada Caalamigu (IPO) ku taliyo inaan kiisaskooda loo qaadanin magangelyo caalami ah (oggolaanshaha qaxootinimada ama magangelyada aan qaxootinimada ahayn.) Maxkamaddani waxay baddashay Maxkamadda Rafcaanka Qaxootiga (RAT) markay taariikhdu ahayd billowgii 2017. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah fadlan booqo barta internetka ee ciwaankeedu yahay sidan: **www.protectionappeals.ie**

[1] **Afeef Dhigasho:** Buug-yarahan waxaa looga gol-leeyahay oo kaliya arrimo la xiriira xog bixin, loomana arki karo inuu yahay talo la xiriirta dhinaca sharciga waxaana suurtagal ah in wax laga baddalo. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah fadlan fiiri Warbixinta Buug-yaraha Codsadayaasha Magangelyada Caalamiga ah adigoo ka heli kara **www.ipo.gov.ie**

# 1 Habraaca gaarka ah ee la marayo

Isbaddalka ugu muhiimsan ee lagu sameeyey Xeerka Magangelyada Caalamiga ah ee soo baxay sannadkii 2015 waa habraaca cusub ee gaarka ah ee la marayo kaasoo la xiriira qiimeynta codsiyada magangelyada caalamiga. Taasoo ay macnaheedu tahay in habraac wadajir ah loo qiimeyn doono oggolaanshaha qaxootinimada, magangelyada aan qaxootinimada ahayn iyo oggolaanshaha sii-joogitaankaba. Tani waxay meesha ka saareysaa inuu dib-u-dhac dheer ku yimaaddo habraaca loo maro magangelyada.

**Oggolaanshaha Qaxootinimada**

**Magangelyada Aan Qaxootinimada Ahayn**

**Oggolaanshaha aad ku joogtid**

**Habraaca Kalida ah**

# 2 Habraaca Codsiga

Sawirkan muuqaalka ahi wuxuu muujinayaa guudmar ku saabsan habraaca loo marayo codsiyada cusub ee laga sameynayo dalka Ireland gudihiisa waxaana loo baahan yahay in tallaabo kasta lala akhriyo qoraalka hoos ku qoran. Booga danbe ee buug-yarahan waxaa laga heli karaa warqado waaweyn oo wax lagu qoro kuwaasoo laga heli karo macluumaad faah-faahsan.

**TALLAABADA 1**
Codsiga loo dirsanayo **Xafiiska Magangelyada Caalamiga**

**TALLAABADA 2**
Wareysiga Hore

**TALLAABADA 3**
Qaab-su'aaleedka

**TALLAABADA 4**
Wareysiga shakhsi ahaaneed

**TALLAABADA 5**
Go'aan la xiriira

**TALLAABADA 6**
Haddii lagu aan lagu guulaysan rafcaanka o gudbiyey **Maxkamadda Magangelyada Caalamiga**

**TALLAABADA 7**
Haddii rafcaanku yahay mid aan lagu guulaysan dib-u-eegis U Oggolaanshaha Sii-joogitaanka

Haddii aad ku guuleysatid helitaanka

**Oggolaanshaha Qaxootinimada, Magangelyada Aan Qaxootinimada Ahaynama Oggolaanshaha sii-joogitaanka**

## **Tallaabada 1** Codsashada Magangelyo Caalami ah

Magangelyada caalamiga waxaad ka codsan kartaa xuduudda Dalka ama kadib marka aad soo gashid dal xubin ka ah Xafiiska Magangelyada Caalamiga. Waxaad awoodi kartaa inaad nafsad ahaantaada iyo/ama ilmo yar oo aad mas'uul ka tahay oo ay da'doodu ka hooseyso 18 sano u dalabtid magangelyo caalami ah. Haddii ay carruurtaadu ku dhalatay Dalka ama ay soo galeen adigoo weli ku guda-jira habraaca loo maro magangelyada waxay si toos ah xaq ugu yeelanayaan inay noqdaan dad aad adigu mas'uul ka tahay ee lagu saleynayo sheegashadaada haddii uuna ahayn muwaadin u dhashay dalka Ireland. Markaad tahay codsade carruur leh waxaa aad muhiim u ah in inta lagu jiro habraaca loo marayo magangelyada aad soo gudbisid dhammaan wixii walaac magangelyo ah ee la xiriira carruurtaada iyo adiga nafsad ahaantaada labadaba.

**Hay'adda Tusla, ee qaabbilsan Carruurta iyo Qoyska,** ayaa dhici karta inay magangelyo caalami ah u weyddiiso carruurta aan cidna la soconin ee daryeelkooda ku hoos jira.

## **Tallaabada 2** Wareysiga Hore

Haddii adiga oo ku sugan xuduudka Dalka, sida garoonka diyaaradaha ama dekad laga soo galo dalka aad dalbatid magangelyo caalami ah, waxaa laga yaabaa inuu wareysi kula yeesho sarkaal ka socda laanta socdaalka iyo/ama sarkaal qaabbilsan magangelyada caalamiga. Ujeeddada laga leeyahay wareysigani waxay tahay in la helo macluumaad hordhac ah oo ku saabsan haybtaada aqoonsi, dalka aad asal ahaan u dhalatay, waddadii aad soo martay marki aad usoo safreysay Ireland iyo sababaha guud ee uu ku saleysan yahay codsigaaga la xiriira magangelyada caalamiga ah. Haddii aan wareysigan hore lagaagaga qaadin markii aad soo galeysay xuduudaha Dalka, waxaa lagaaga qaadayaa Xafiiska Magangelyada Caalamiga.

Sidoo kale wareysiga hore waxaa lagu qiimeynayaa in codsigaaga la qaban karo. Taasoo ay macneheedu tahay in sarkaalka ka shaqeeya Xafiiska Magangelyada Caalamiga ahi uu qaadan doono ggo'aan la xiriira inaad awood u leedahay inaad magangelyo ka codsato Ireland. Waxaa dhici karta inaad awoodi kari weydo inaad sidaa yeeshid haddii ay jirto inaad dal kale oo xubin ka ah Midowga Yurub aad horey uga qaadatay oggolaansho qaxootinimo ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn, amaba haddii uu jiro dal kale oo ka baxsan Midowga Yurub kaasoo ku siiyey oggolaansho qaxootinimo adigoo ka haysta oggolaansho aad dib ugu laanab kartid isla mar ahaantaana ka heli kara magangelyo.

**Maxaa dhici kara haddii la ogaado inuu codsigeygu yahay mid aan la qaban karin?**
**Waxaad sarkaalka qaabbilsan Magangelyada Caalamiga ka heli doontaa go'aan ay ku qeexan tahay sababtu ay weheliso waqti xaddidan oo aad rafcaan ugu soo gudbin kartid maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga. Racfaanka loo dirayo Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga waxaa loo baahan yahay inuu ahaado mid qoraal kaliya ah.**

Haddii wareysiga hore lagaaga soo qaaday xuduudaha Dalka, waxaa lagu siin doonaa jiheyn la xiriirta sidii aad ku tagi lahayd Xafiiska Magangelyada Caalamiga. Xafiiska Magangelyada Caalamigu wuxuu adiga iyo carruurta aad mas'uulka ka tahayba ka qaadi doonaa faraha iyo sawirro. Macluumaadkan waxa loo qaadayaa ujeeddada hubinta qofka aad tahay iyo inay Shuruucda Dublin lagu dabaqi karo iyo in kaLe kiiskaaga.

Kadib waxaa laguu soo saari doonaa shahaado degganaasho kumeel-gaar ah oo qeexaysa inaad haysatid oggolaansho aad u joogi kartid dalka Ireland codsigaaga magangelyada caalamiga. Tani maaha kaar aqoonsi oo rasmi ah hase ahaatee waxaa lagaaga baahan yahay inaad wadatid waqti kasta. Waxaa dhici karta in laguu cusbooneysiiyo inta lagu jiro habraaca loo marayo magangelyada.

## **Tallaabada 3** Qaab su'aalesu'aaleedka

Sarkaal ka mid ah Xafiiska Magangelyada Caalamiga ayaa ku siin doona buug-yare ka xog-warramaya habraaca gaarka ah ee la marayo iyo qaab su'aaleed loo baahan yahay inaad buuxisid kadibna aad kusoo celineysid Xafiiska Magangelyada Caalamiga. Waxaa aad muhiim u ah in kahor inta aadan buuxinin qaab su'aaleedka akhrisatid xogta ku qoran buug-yaraha isla mar ahaantaana aad dalbatid wixii taageero dhinaca sharciga ah ee aad u baahan tahay.

Waxaa muhiim ah inaad si dhammaystiran u buuxisid qaabsu'aaleedka isla mar ahaantaana aad soo gudbisid macluumaad dhab ah oo la xiriira baahiyaha aad u qabtid magangelyada caalamiga. Haddii aadan fahmi karin qeybo ka mid ah qaab su'aaleedka, ka dalbo qareenkaaga Inuu kuu fidiyo taageero.

Haddii ay suurtagal tahay, waxaa loo baahan yahay in qaab su'aaleedka dib loogu soo celiyo xafiiska muddo 20 maalmood oo shaqo gudaheed ah matalan,. 4 toddobaad. Taasoo looga gol-leeyahay in Xafiiska Magangelyada Caalamiga laga caawiyo sidii ay codsigaaga ugu si wadi lahayd si habsami ah. Haddii aad u baahan tahay inaad heshid waqti dheeraad ah oo aad ku buuxisid qaab su'aaleedka ama inaad la tashatid la-taliye qaabbilsan arrimaha sharciga Xafiiska Magangelyada Caalamigu wuxuu codsadayaasha u damaanad qaadayaa in la yeeli karo hadba sidii ay duruufuhu oggolaanayaan. Haddii ay kugu dabbaqmeyso xaaladdan oo kale kala hadal qareenkaaga ama si toos ah ula xiriir Xafiiska Magangelyada Caalamiga si ay u ugu suurtagasho inay xaaladaada ogaadaan (Si aad u hesho macluumaadka kula xiriirka fiiri bogga 21).

Waxaa muhiim ah inaad soo gudbisid dhammaan wixii dhukmintiyo ah ee ku caawin kara ay kula tahay inay xiriir la leedahay codsigaaga. Waxaa ka mid ah wixii macluumaad ah ee la xiriira codsigaaga oggoloaanshaha sii-joogitaanka.

## **Tallaabada 4** Wareysiga Shakshi ahaaneed

Xafiiska Magangelyada Caalamigu wuxuu kuusoo diri doonaa warqad ay ku qoran tahay waqtiga ballanta wareysiga lagula yeelanayo. Haddii lo baahdo, waxaa laguu ballamin doonaa qof tarjubaan ah. Haddii ay jiraan wax macluumaad dheeraad ah iyo/ama wax caddeymo ah oo aad haysid kadib marka aad soo gudbisid qaab su'aaleedka isku-day inaad macluumaadkaas iyaga ah soo gudbisid ugu yaraan hal toddobaad kahor waqtiga ballanta wareysiga lagula yeelanayo.

Wareysigu wuxuu fursad kuu siinayaa inaad soo gudbisid dhammaan sababaha kugu kallifay inaad magangelyo ka dalbatid dalka Ireland. Marka la gaaro maalinka wareysiga fadlan hubi in adiga iyo tarjubaanku aad is-fahmi kartaan.

Haddii ay jiraan wax caqabado is-fahmi la'aan ah oo aad ka dareemeysid tarjubaanka u sheeg sarkaalka Xafiiska Magangelyada Caalamiga. Sarkaalka Xafiiska Magangelyada Caalamigu wuxuu marka hore sii akhrisan doonaa qaab su'aaleedkii aad soo buuxisay taasina waxay u suurtagelineysaa inuu kiiskaaga wax ka ogaado. Haddii ay jiraan wax caqabado ah oo la xiriira fahmitaanka su'aalaha uu ku weydiinayo sarkaalka ka socda Xafiiska Magangelyada Caalamiga fadlan u sheeg isaga naf ahaantiisa/iyada naf ahaanteeda si mar kale laguugu soo celiyo su'aasha. Fadlan waa inaad maanka ku haysid inaad Wasiirka ku wargelisid wax alla wixi isbaddal ah ee ku yimaadda duruufaha la xiriira xaqa aad u leedahay codsigaaga oggolaansha sii-joogitaanka ilaa laga gaarayo waqtiga laga diyaarinayo warbixin uu Wasiirku diyaarinayo ee la xiriirta go'aanka oggolaanshaha aad ku joogtid.

Haddii aad rabtid inaad soo gudbisid macluumaad dheeraad ah oo khuseeya oggolaanshaha sii-joogitaanka ee codsigaaga, tani waxay kuu noqon kartaa fursad aad kusoo gudbin kartid. Adiga ama qareenkaagu waxaad awoodi kartaan inaad soo gudbisaan fikrado aad qabtid iyadoo qoraal ah la xiriirta codsigaaga adigoo qoraalka ku xusaya taariikhdii lagula yeeshay wareysiga.

Sarkaalka Xafiiska Magangelyada Caalamiga ah ee ku wareysanaya wuxuu qoraal ahaan u diiwaan-gelinayaa wareysigaaga. Haddii ay lagama maarmaan noqoto waxaa dhici karta in inta lagu jiro waqtiga wareysiga lagula yeelanayo in qofka ku wareysanaya uu hakiyo wareysiga lagula yeelanayo kadibna uu kaa


dalbado inaad dib u fiirisid qodobada aad sheegtay isla mar ahaantaana aad wax si fiican u qeexdid ama aad wax saxdid. Intaa kadib waxaa lagaa codsan doonaa inaad saxeexdid diiwaanka qoraalka laga sameeyey wareysiga si aad u xaqiijisid inuu yahay mid sax ah. Haddii diiwaanka qoraalka wareysiga ay ku jiraan wax aan sax ahayn, ama haddii ay jiraan wax la hilmaamay, si toos ah ugu sheeg sarkaalka ku wareysanaya si ay suurtagal kuugu noqoto inaad si fiican u qeexdid.

Qareenkaagu wuxuu awood u leeyahay inuu goobjoog ka ahaado wareysiga haddii uu u baahdo inuu sidaas yeelo hase ahaatee tani maaha habdhaqan caadi ah. Garyaqaankaagu/Garyaqaanadaadu waxay awood u leedahay in iyagoo adiga kaa wakiil ah ay soo gudbiyaan wixii fikrado ah ee aad qabtid kahor waqtiga ballanta wareysigaaga. Haddii aad tahay qof carruur ah oo aan cidina wehelinin waxaa loo baahan yahay inay wareysiga goob-joog ka ahaadaan hay'adda Tusla ama qofka mas'uulkamas'uulka kaa ah. Wareysiga waxaa dib loo dhigi karaa oo kaliya haddii ay jiraan duruufo aan caadi ahayn, tusaale ahaan, marka ay kula soo deristo xaalad caafimaad darro. Waxaa muhiim ah inaad si deg-deg ah ugu wargelisid Xafiiska Magangelyada Caalamiga haddii aadan ka soo xaadiri karin taariikhda laguu qabtay ballanta wareysiga. Waxaa dhici karta in laga kaaftoomo qaaditaanka wareysiga iyadoo la fiirinayo duruufo gaar ahaaneed.[2]

# **Tallaabada 5** Go'aanka Xafiiska Magangelyada Caalamiga

Wareysiga kadib Xafiiska Magangelyada Caalamigu wuxuu tixgelin gaar ah siin doonaa dhammaan macluumaadka khuseeya kiiskaaga. Kuwaasoo ay ku jiraan qoraalka diiwaanka ee wareysigaaga iyo qaab su'aaleedka aad soo buuxisay. Haddii ay dhacdo in muddo lix bilood gudahood ah aan wax go'aan ah lasoo saarin waxaad awoodi kartaa inaad Xafiiska Magangelyada Caalamiga ka codsatid qiyaas ahaan inta uu le'eg yahay waqtiga aad ku heli kartid go'aan ku saabsan kiiskaaga.

Natiijooyinka kala duwan ee kasoo bixi kara go'aanka waxay ku qeexan yihiin shaxda hoose. Go'aanka waxaa ku jira qiraal ay ku qeexan tahay sababaha loo cuskadey go'aanka laga gaarey codsigaaga shakhsiga ah. Sidoo kale waxaa jira natiijooyin gaar ah oo la xiriira go'aanka kuwaasoo saameyn ku yeelan kara waqtiga xaddidan ee la oggol yahay rafcaan-qaadashada iyo sidoo kale in Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamigu horteeda laguu oggol yahay dacwad dhageysasho iyo iyo in kale.




[2] Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah fadlan fiiri cutubka 4.5.12 Buug-yaraha Xafiiska Magangelyada Caalamiga ee loogu talagalay Codsadayaasha Magangelyada Caalamiga.

Adiga iyo/ama qareenkaagu waxaad heli doontaan go'aanka iyadoo la idiinku soo diri doono boosto diiwaan-gashan. Haddii Xafiiska Magangelyada Caalamigu ku taliyo in lagu siiyo oggolaanso qaxootinimo, Wasiirka Cadaaladda iyo Garsoorku (wasiirku) wuxuu muddo dhowr toddobaad gudahood kugu siin doonaa baaqa qaxootinimada. Waxaa jira xaalado dhif ah oo ay dhici karto inuu Wasiirku diido inuu raaco talada Xafiiska Magangelyada Caalamiga gaar ahaan haddii qofka codsadaha loo arko inuu khatar ku yahay nabadgelyada.

Haddii laguu diido oggolaanshaha qaxootinimada hase ahaatee lagu siiyo magangelyada qaxootinimada aan ahayn waxaad weli xaq u leedahay inaad rafcaan ka qaadato maxkamadda rafcaanka magangelyada caalamiga adigoo ka dalbanaya oggolaansho qaxootinimo. Haddii laguu diiido oggolaanshaha qaxootinimada iyo magangelyada qaxootinimada aan ahayn labadaba xaaladoodba Wasiirka ayaa go'aan ka qaadanaya in lagu siin karo "oggolaanshaha aad ku joogtid" iyo in kale. Haddii uu go'aanku noqdo in lagu siiyo oggolaanshaha sii-joogitaanka iyo haddii kaleba, waxaad weli xaq u leedahay inaad rafcaan ka qaadatid maxkamadda rafcaanka magangelyada caalamiga horteeda adigoo ka dacwoonaya go'aanka laguugu diiday magangelyo caalami ah.

Haddii laguu diido qaxootinimo iyo/ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn, waxaa lagu siin doonaa qoraalka diiwaanka wareysigaaga iyo qiraal caddeyn ah oo ay ku qeexan tahay inaad xaq u leedahay rafcaan ka-qaadashada Maxkamada Racfaanka Magangelyada Caalamiga. Waxaad heli doontaa xog ku saabsan habraaca la marayo iyo foomka rafcaanka ee loo baahan yahay in lasoo gudbiyo. Si aad u heshid macluumaad faah-faahsan oo la xiriira natiijooyinka suurtagalka ah ee kasoo bixi kara codsigaaga, fadlan milicso xaashida danbe ee buug-yarahan.

## Tallaabada 6 Rafcaan-ka-qaadashada Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga

Waxaad awoodi kartaa inaad rafcaan u gudbisid Maxkamadda Racfaanka Magangelyada Caalamiga adigoo ka dacwoonaya go'aan uu gaarey Xafiiska Magangelyada Caalamigu oo khuseeya inaadan xaq u lahayn oggolaansho qaxootinimo ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn. Ma jiro wax rafcaan ah oo laga qaadan karo arrimaha la xiriira go'aanka diidmada oggolaanshaha aad ku joogtid.

Waxaa lagama-maarmaan ah in lasoo buuxiyo foomka rafcaanka kadibna loo gudbiyo Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga iyadoo la dhowrayo waqtiga laguu qabtay kaasoo aad ka heli kartid xaashida go'aanka ee uu ku siiyey Xafiiska Magangelyada Caalamigu. Waxaad awoodi kartaa inaad dalbatid dacwad dhageysi ah oo laga yeelanayo rafcaankaaga taasina waxay ku xiran tahay natiijada ku xusan xaashida go'aankaaga ee uu ku siiyey Xafiiska Magangelyadu.

Waxaa lagugu wargelin doonaa taariikhda ay dhaceyso dacwadda dhageysigu. Marka la gaaro maalinka dhagaysiga, hadii loo baahan yahay turjumaan, fadlan hubi in adiga iyo tarjubaanku aad is-fahmi kartaan. Haddii ay jiraan wax caqabado is-fahmi la'aan ah oo aad ka dareemeysid tarjubaanka u sheeg xubin ka mid ah Maxkamadda Rafcaanka. Inta ay socoto dacwadda dhageysigu waxaa goob-joog noqonaya adiga iyo xubin ka socda Xafiiska Magangelyada Caalamiga, qareenkaaga ama garyaqaanka maxkadaha rafcaanka iyo Xubin ka mid ah Maxkamadda. Sidoo kale Xubinka Maxkamadda Rafcaanku wuxuu awood u leeyahay inuu amro in Maxkamadda Racfaanka horteeda uusoo xaadiro qof markhaati ah oo soo gudbiya caddeyn la xiriirta waxyaabo khuseeya codsigaaga magangelyada.

Haddii Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamigu ay diiddo go'aanka kasoo baxay Xafiiska Magangelyada Caalamiga Wasiirku wuxuu kuusoo saari doonaa baaqa magangelyada ee la xiriirta kiiskaaga tus,. oggolaansho qaxootinimo ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn.

**Ka warran haddii Xafiiska Magangelyada Caalamigu I siiyo go'aanka oggolaanshaha sii-joogitaanka isla mar ahaantaana aan rabo inaan rafcaan ka qaato go'aanka diidmada qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn?**

**Haddii lagu siiyo oggolaanshaha sii-joogitaanka waxaad weli awood usii leedahay inaad rafcaan ka qaadatid go'aanka Xafiiska Magangelyada Caalamigu uu kuugu diiday magangelyo caalami ah. Waxaad awood u leedahay inaad oggolaanshahaaga sii-joogitaanka ka diiwaan-gelisid xafiiska qaabbilsan arrimaha socdaalka ee deegaankaaga.**

# **Tallaabada 7** Dib-u-fiirinta Oggolaanshaha aad kujoogtid

Haddii uu Wasiirku ku siin waayo oggolaanshaha sii-joogitaanka, isla mar ahaantaana aad ku guuleysan weydo rafcaan aad ka qaadatay Maxkammada Rafcaanka Magangelyada Caalamiga, Wasiirka ayaa dib u fiirin doona go'aanka laguugu diiday oggolaansha sii-joogitaanka haddii ay jiraan wax macluumaad cusub oo aad soo gudbisiay tan iyo markii lagu siiyey go'aanki hore ee diidmada. Waxaad heli doontaa foom la buuxinayo oo loogu talo-galey oggolaanshaha sii-joogitaanka. Waxaad haysataa oo kaliya **muddo 5 maalmood oo shaqo ah** si aad usoo gudbisid wixii macluumaad cusub sidaa darteed waa inaad xaqiijisid inaad heli kartid wax alla wixii dhukminti ah ee aad u baahan tahay si aad usoo gudbisid waqti hore. Haddii ay wax iska baddalaan duruufahaaga inta u dhaxaysa waqtiga go'aanka hore ee Wasiirka ee la xiriira go'aanka hore joogitaanka iyo go'aanka ay Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamigu ka qaadatay rafcaankaaga isla mar ahaantaana aad heli kartid macluumaad cusub oo khuseeya dib-u-fiirinta oggolaanshahaaga sii-joogitaanka waxaa markaas lagaaga baahan yahay inaad sida ugu deg-degga badan ee suurtagalka ah ugu wargelisid Wasiirka.

Sidoo kale waxaa dhici karta inuu Wasiirku bixiyo oggolaanshaha sii-joogitaanka waase haddii ay taasi qasab noqoneyso si ayna u dhicin in lagu xadgudbo mamnuucitaanka qasab-ku-masaafurinta (si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, fiiri **7. Su'aalaha Mar-kasta la isweyddiiyo**).

# MAXAY TAHAY XUQUUQDEYDU?

**Xuquuqdaada waxaa ka mid ah:**
Haddii aad tahay qof codsanaya magangelyo caalami ah xuquuqda aad leedahay waxaa ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Oggolaansho gelitaan iyo mid joogitaan ee dalka Ireland oo ujeeddada laga leeyahay tahay sidii loo hubin lahaa hirgelinta magangelyada caalamiga ee Xafiiska Magangelyada Caalamiga iyo Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga
- Xaqa aad u leedahay helitaanka talo sharciyeed iyo wakiilnimo qareen
- aad u leedahay in laguula dhaqmo qaab ixtiraam, sharaf iyo cadaaladi ku jirto inta aad ku jirtid habraaca gaarka ah ee la marayo
- Xaqa aad u leedahay helitaanka qoraallada loo gudbinayo Wasiirka ee khuseeya codsigaaga magangelyada
- Adeegsiga qof tarjubaan ah haddii loo baahdo si hubanti looga dhigo wada xiriirka
- Xaqa loo leeyahay asturnaanta
- Xaqa aad u leedahay in qaab qoraal ah laguugu wargeliyo wixii wareysiyo, go'aano ama ogeysiisyo kale oo khuseeya codsigaaga magangelyada caalamiga.
- Xaqa aad u leedahay la xiriiritaanka xafiiska UNHCR

Talo-bixinta sharciga waxaa laga heli karaa **Guddiga Taageerada Sharciga (LAB)**. Waxay ku siin doonaan mid ka mid ah qareenadooda ama qareen gaar ah oo iyaga la shaqeeya. Guddigu (LAB) wuxuu u heellan yahay inuu macaamiisha magangelyada caalamiga siiyo talo-bixin dhinaca sharciga ee waqtiga hore taasoo la xiriirta dhammaan dhinac kasta oo khuseeya arrimahacodsigooda. Taas waxa ka mid ah la-tashi macluumaad hore ah kahor inta aadan buuxin qaab su'aaleedkaaga iyo talo-bixin ka horreysa wareysiga lagula yeelanayo taasoo lagaala talin doono arrimaha dhinaca sharciga ee la xiriira sheegashadaada sida ku qeexan qaab su'aaleedka aad soo buuxisay. Sidoo kale **Xarunta Sharciga ee Golaha Qaxootiga Ireland e Madaxa-banaan** waxay bixisaa talooyin dhinaca sharciga ee waqtiga hore taasoo ku xiran heerka kartida. Haddii aad dhaqaale haysatid waxaad awoodi kartaa inaad dalbatid adeegyada ay bixiyaan qareenada gaarka ahi.

Iyadoo lagu saleynayo duruufaha shakhsiga ah ee khuseeya codsigaaga waxaad dooran kartaa inaad dalbatid qof tarjubaan oo jinsi rag/dumar gaar ah waqtiga lagu wareysanayo ama waqtiga dhageysiga rafcaankaaga. Waxaa muhiim ah in haddii ay suurtagal tahay arrintan aad waqti hore ku wargelisid Xafiiska Magangelyada Caalamiga iyo/ama Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga si loo maareeyo codsigaagan haddii ay suurtagal tahay.

Dhammaan macluumaadka aad soo gudbisay ee la xiriira codsigaagga waxaa loola dhaqmayaa si gaar ah oo sir ahaaneed isla mar ahaantaana looma gudbin doono laamaha dalka aad u dhalatay/dalka aad deegaanka ku leedahay ama wakiilada matala dalkaaga ee kunool Ireland.

# WAA MAXAY WAAJIBAADKAYGU?

### Waajibaadkaaga waxaa ka mid ah:

- Waajib ayaa kaa saaran inaad u hoggaansantid shuruucda u deggan Ireland

Taasoo macneheedu yahay inaad dhowrtid shuruucda iyo xeerarka u degsan Ireland.

- Waajib ayaa kaa saaran inaad la timaadid iskaashi wada-shaqeyn

Maadaama aad tahay qof codsade ah inta lagu jiro habraaca gaarka ah ee la marayo waajib ayaa kaa saaran inaad la timaadid iskaashi marka la qiimeynayo codsigaaga magangelyada iyo wixii go'aan-qaadasho ah ee la xiriira codsigaaga. Waxaa lagaaga baahan yahay inaad sida ugu deg-degga badan ee ugu macquulsan kusoo gudbisid dhammaan macluumaadka loo baahan yahay si lo xaqiijiyo codsigaaga isla mar ahaantaana uu u noqdo mid run ah. Ku gaabinta iskaashiga wada-shaqeyntu waxay saameyn ku yeelan kartaa natiijada kasoo bixi doonta codsigaaga magangelyada.

### Waajibaadyada la xiriira habraaca la marayo

Qeyb ka mid ah iskaashiga wada-shaqeynta waxaa ka mid ah waajibaadyada hoos ku xusan:

a. Inaadan ka bixin ama aadan isku dayin inaad ka tagtid dalka Ireland inta lagu jiro habraaca gaarka ah ee la marayo adigoo aan oggolaansho ka haysanin Wasiirka;

b. Inaad Wasiirka hab qoraal ah ku wargelisid ciwaankaaga iyo wixii isbaddal ah ee ku yimaadda ciwaankaaga sida ugu deg-degga badan;

c. Inaad u hoggaansantid wixii warbixin ogeysiis ah ee laga yaabo in laguu soo diro sida in lagaaga baahan yahay inaad degganaatid ama aad ku negaatid goob ama deegaan gaar ah oo ka mid ah Ireland iyo/ama inaad waqtiyo gaar ah warbixin u gudbisid sarkaal ka tirsan laanta socdaalka, ama saldhigga booliiska;

d. Inaad dhammaan wixii waraaqo ah ee aad u qoreysid Xafiiska Magangelyada Caalamiga ama Maxkamadda Racfaanka Magangelyada Caalamiga ku muujisid magacaaga, dhalashadaada iyo lanbarka aqoonsiga Shakhsiga ee ku qoran shahaadadaada degganaanshaha kumeel-gaarka;

e. Inaad run ka sheegtid arimaha la xiriira codsigaaga magangelyada caalamiga iyo inaad qaab su'aaleedkaaga ku buuxisid macluumaadka khuseeya kiiskaaga si loo qiimeeyo codsigaaga;

f. Inaad haysatid dhammaan nuqullada dhukmintiyada ee lagu siiyey ama kuwa aad u gudbisay Xafiiska Magangelyada Caalamiga iyo Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga.

**Ma shaqayn karaa inta codsigeyga magangelyada caalamiga la baarayo?**

**Haddii aadan go'aan uga helin IPO codsigaaga magangelyada 6 bilood gudahooda, oo ficillo aad adiga laftaadu qaadday aanay sababin daahidda, waxaad codsan kartaa ruqsadda shaqada. Wixii macluumaad dheeraad ah eeg: Wixii macluumaad dheeraad ah eeg: www.inis.gov.ie**

# 4 Macluumaad Kale ee Khuseeya Arrinta

### Kala horraysiinta u mudnaanta

Noocac codsiyada qaarkood ayay Xafiiska Magangelyada Caalamigu mudnaanta hore siin kartaa. Taasoo ay macneheedu tahay in loogu qaban doono ballanta wareysiga waqtiga ugu deg-degga badan ee suurtagalka ah. Tani kama tarjumeyso in go'aan hordhac ah laga qaadanayo kiisaska noocan oo kale ah ama in damaanad-qaad dheeraad ah la siinayo marka go'aanka laga gaarayo kiisaska noocan oo kale ah.

Waxaa dhici karta in kiiskaaga la siiyo ahmiyad gaar ah iyadoo loo cuskanayo sababo gaar ahaaneed, kuwaasoo ay ku jiraan inay da'doodu ka weyn tahay 70 sano (iyo inaadan ka mid ahayn koox ka kooban qoys), ilmaha aan cidina wehelinin, iyadoo la tixgelinayo sababo caafimaad oo khatar ah ama iyadoo lagu saleynayo dalka aad u dhalatay (dalalka Siiriya, Eritrea, Ciraaq, Afqanistaan, Iraan, Liibiya iyo Soomaaliya).

Kadib wadatashi uu Xafiiska Magangelyada Caalamigu la yeeshay hay'adda UNHCR, wuxuu soo saaray ogeysiis ku saabsan ahmiyad-siinta dabaqado gaar ah oo codsiyo ah kuwaasoo laga heli karfo halkan: http://www.ipo.gov.ie/en/ipo/pages/prioritisation_applicants

### Dib-ula-noqoshada codsiga

Waxaad xor u tahay inaad dib ula noqotid codsigaaga magangelyada ama rafcaankaaga waqti-kasta kahor inta uuna Xafiiska Magangelyada Caalamigu diyaarinin warbixin ku saabsan codsigaaga ama inta ayna Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamigu soo saarin wax go'aan ah. Waa muhiim inaad raadsato la-talin sharciyeed kahor inta aadan dib ula noqonin codsigaaga si ay suurtagal kuugu noqoto inaad si dhammaystiran u fahamtid wixi saaamayn ah ee dib-ula-noqoshada codsigu ku yeelan karto adiga laftaada iyo dadka aad mas'uulka ka tahay labadaba. Isla marka aad dib ula noqotid codsigaaga waxaa lasoo gabagabeynayaa qiimeynta codsigaaga isla mar ahaantaana Wasiirku wuxuu diidi doonaa inuu ku siiyo oggolaanshaha qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn.

### Dib u laabashada ikhtiyaarka ah

Waxaad ikhtiyaar u leedahay inaad si iska aah ah dib ugu laabatid dalka aad asal ahaan kasoo jeeddid/dalka aad deggenaanshaha ku leedahay inta lagu jiro marxalad kasta oo ka mid ah habraaca gaarka ah ee la marayo. Haddii aad go'aansatid inaad si ikhtiyaarka ah dib ugu laabatid dalkaaga hay'adda Qaabbilsan arrimaha socdaalka ee loo yaqaan (IOM) waxay awood u yeelan kartaa inay ku siiso taageero iyo talo, taasoo ay ku jirto taageerada maaliyadeed ee socdaalkaaga. Sidoo kale Waaxda qaabbilsan dib-u-laabashada ikhtiyaarka ah ee INIS waxay awood u leedahay inay ku siiso taageero.

Si ay suurtagal kuugu noqoto inaad ka faa'iideysatid dib-u-laabashada ikhtiyaarka ah inta lagu jiro habraaca la

marayo, waxaa waajib kugu ah inaad dib ula noqotid codsigaaga magangelyada caalamiga ee aad u gudbisay Xafiiska Magangelyada Caalamiga ama inaad dib ula noqotid rafcaanka aad u gudbisay Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga. Sidoo kale Wasiirku wuxuu kugu wargelin doonaa suurtagalnimada helitaanka dib-u-laabashada ikhtiyaarka ah ee dalka aad kasoo jeedid/dalka aad deegaanka ku leedahay kadib marka lasoo gabagabeeyo habraaca la marayo gaar ahaan haddii ay dhacdo in dalka Ireland lagaaga diido magangelyo caalami ah iyo sidoo kale inaan lagu siinin oggolaanshaha sii-joogitaanka. Si aad u heshid xog dheeraad ah u hesho, fadlan eeg: **https://www.youtube.com/watch?v=eX7GarY2rUE**

### Shuruucda EU ee Dublin

Shuruucda EU ee Dublin (EU Dublin Regulation) waa aalad sharciyeed go'aamisa dal xubneedka ka mas'uulka ah baarista codsiga la xiriira magangelyada caalamiga. Marka aad gudbineysid codsi ku saabsan magangelyada caalamiga Xafiiska Magangelyada Caalamigu wuxuu ku siin doonaa buug-yare ka xog-warramaya Shuruucda EU ee Dublin. Waxaa muhiim ah inaad si taxadar leh u akhrisatid macluumaadka ku qoran buug-yarahan maadaama ay jiraan sababo badan oo la xiriira Dawladda ka Tirsan Xubnaha EU ee mas'uulka ka ah qiimeynta codsigaaga, taasoo ay ku jirto haddii ay jiraan xubno ka mid ah qoyskaaga oo waqti-xaadirkan ku sugan Dal kale oo ka mid ah Xubnaha EU. Haddii uu codsigaagu yahay mid xiriir la leh Shuruucda EU ee Dublin waxaa lagu siin doonaa buug-yare kale oo ku saabsan habraaca loo marayo shuruucda Dublin iyo saameynta uu ku yeelan karo kiiskaaga shakhsiga ah.

### Codsiga kale oo waqti danbe ah oo la xiriira magangelyada caalamiga

Haddii laguu diido qaxootinimada iyo magangelyada qaxootinimada aan ahayn isla mar ahaantaana lasoo xiray codsigaaga, waxaa loo baahan yahay inaad oggolaansho ka heshid Wasiirka haddii aad rabtid inaad soo gudbisatid codsi kale oo aad ku dalbaneysid magangelyo caalami ah oo aad ka heshid dalka Ireland. Waxaad codsi u qoran kartaa Wasiirka adigoo ka dalbanaya inuu kuu oggolaado inaad soo gudbisatid codsi kale. Arrimaha fiiro gaar ah lo yeelanayo waxaa ka mid ah kuwa hoos ku qoran:

a. Marka aad haysid macluumaad cusub oo la xiriira codsigaagii hore taasoo kuu suurtagelin karta inaad u qalantid helitaanka magangelyo caalami ah taasoo ayna duruufuhu kuu oggolaanin inaad soo gudbisid codsigaagii hore;

b. Haddii aad dib ula noqotay codsigaagii hore ama uu kuula muuqdo inaad dib ula noqotid, taasoo aan ku imanin khalad aad adigu gashay, ama inaad awoodi kari weyday sii-waditaanka codsigaagii hore.

Haddii uu Wasiirku diido inuu kuu oggolaado soo gudbinta codsiga waqtiga danbe ee la xirira magangelyada caalamiga, waxaa laguu soo gudbin doonaa go'aan ay ku qeexan tahay sababtu adigoo awood u leh inaad rafcaan ka qaadatid Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga.

### Dib-u-fiirin la xiriirta dhinaca Garsoorka

Dib-u-fiirinta dhinaca garsoorku waa qaab ay Maxkamadda Sare ugu kuurgasho laamaha qaabbilsan arrimaha maamulka iyo Maxkamadaha, taasoo ay ku jiraan Xafiiska Magangelyada Caalamiga iyo Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga si ay suurtagal u noqoto in hubanti looga dhigo in wixii go'aanno ah loo qaatay qaab wacan oo waafaqsan sharciga. Dib-u-fiirinta garsoorku ma aha rafcaan. Tani waxay codsadaha u suurtagelineysaa, iyaga oo la-tashanaya qareenkiisa/keeda, inay raadiyaan sidii go'aanka ka soo baxay Xafiiska Magangelyada Caalamiga iyo/ama Maxkammadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga inay Maxkamadda Sare ee Ireland dib ay ugu fiiriso iyadoo waafaqsan sharciga arrimaha maamulka, tusaale ahaan markay jirtay khalad sharci oo la xiriira habraaca loo maray go'aan-qaadashada khuseeya codsiga qofka. Qareenkaagu wuxuu ku siin doonaa talo la xiriirta inay tani khuseyso codsigaaga. Waxaa muhiim ah inaad fiiro gaar ah u yeelatid inay Maxkamadda fulineysa dib-u-fiirintu ayna awood u lahayn inay soo jeediso go'aan waxtar leh oo khuseeya magangelyo caalami ah hase ahaatee waxay awood u leeyihiin inay Xafiiska Magangelyada Caalamiga ama Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga ka dalbadaan inay qaataan go'aan cusub oo tixgelinaya natiijooyinka la xiriira arrimaha garsoorka ee Maxkamadda. Sidoo kale dacwadaha la xiriira dib-u-fiirinta garsoorka waxaa lagu dacweyn karaa Wasiirka Garsoorka iyo Cadaaladda. Fadlan kala-hadal qareenkaaga si uu u qaato go'aan la xiriira labada arrimood midkoodii loo baahan yahay in lagu hirgeliyo kiiskaaga.

## Xiritaan

Guud ahaan dadka codsadayaasha laguma xiro dalka Ireland gudihiisa inta lagu jiro habraacyada loo marayo magangelyada. Haddana sidaasoo ay tahay, waxaa jira xaalado gaar ah oo u suurtagelineysa sarkaalka qaabbilsan arrimaha socdaalka ama xubin ka mid ah saldhigga booliska inay soo xiraan qofka wax dalbanaya iyadoo aan la haysanin wax xaashi xiritaan ah haddii ay dhacdo in si macquul ah loo tuhmo qofka wax dalbanaya:

I. in loo arko khatar ku wajahan nabadgelyada guud ama nidaamka guud ee kala-danbeynta Dalka;
II. haddii uu qofku horey usoo galey danbi aan ahayn mid siyaasadeed oo khatar ah meel ka baxsan dalka Ireland;
III. inuuna dadaal macquul ah ku bixinin sugitaanka aqoonsigiisa hayb ahaaneed ama aqoonsigeeda hayb ahaaneed;
IV. inuu qofku doonayo inuu ka dhoofo dalka Ireland isagoo aan haysanin oggolaansho sharci ah oo uu ku geli karo dal kale;
V. inuu fuliyey ama uu doonayo inuu fuliyo fal kaasoo minjo-xaabin kara nidaamka u degsan bixinta magangelyada caalamiga ee la siiyo shakhsiyaadka kunool Dalka, ama wixii arrimo kale ah ee khuseeya Deegaanka socdaalka ee la Wadaago ama Common Travel Area, ama
VI. iyadoo ayna jirin sabab macquul ah, ayuu jeex-jeexay aqoonsigiisii ama aqoonsigeedii ama dhukmintiga lagu socdaalo, ama waxaa lagu helay haysashada dhukminti been-abuur ah, mid wax laga baddalay ama mid gebi ahaanba la baddalay.

Qofka codsadaha ee la xiro iyadoo loo cuskanayo xaaladahan iyaga ah waxaa loo qaadi karaa oo lagu xiri karaa goobo gaar ah oo loogu talo-galey arrimahan waafaqsan sharciga. Carruurta, oo ah dadka ay da'doodu ka hooseyso 18 sano, lama xiri karo sida ku cad sharcigan.

**Ma codsadan karaa magangelyo caalami ah haddii aan booliiska u xirnahay ama aan ku jiro goob dadka lagu hayo?**

**Waxaad awoodi kartaa inaad dalbatid magangelyo caalami ah adigoo xiran ama ku jira goobta dadka lagu sii hayo. Waxaa lagaa rabaa inaad Guddoomiyaha xabsiga ama Mas'uulka saldhigga booliiska si deg-deg ah ugu wargelisid goobta lagugu xiray haddii aad dooneysid inaad gudbisatid codsi. Kiiskaaga ahmiyad gaar ah ayaa la siin doonaa haddii aad kusii jirtid goobta dadka lagu hayo inta lagu jiro hawlaha la xiriira qiimeynta codsigaaga.**

**Ma laga yaabaa inay Maxkamadi dib u fiiriso xiritaankeyga?**

**Haddii sababta laguu xiray ay tahay mid ka mid ah arrimaha kor ku xusan waxaa sida ugu deg-degga badan ee suurtagalka ah lagugu horkeeni doonaa qaadiga Maxkamadda Degmada ee deegaanka aad ku xiran tahay. Qaadiga Maxkamadda degmadu wuxuu dib u fiirin doonaa adeegsiga xiritaanka isagoo ku jaangoynaya duruufaha shakhsi ahaaneed ee kiiskaaga.**

# 5 Ka-faa'iideystayaasha Magangelyada Caalamiga:

### Xaq u laahaanteyda la xiriirta ka-faa'iideysashada magangelyada caalamiga ah

Haddii lagu siiyey caddeynta qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn waxaad xaq u yeelaneysaa in:

- Laguu oggolaado inaad degganaatid dalka Ireland muddo kooban oo aan ka yareyn 3 sanadood;
- Inaad raadsatid shaqo isla mar ahaantaana lagu shaqaaleysiiyo, inaad ku lug yeelatid ganacsi, baayac-mushtari ama xirfad;
- Helitaanka waxbarashada iyo tababbarro si la mid ah muwaadiniinta u dhalatay dalka Irishka;
- Helitaanka daryeelka caafimaadka iyo faa'iidooyinkalaga helo adeegyada bulshada si la mid sida muwaadiniinta Irishka;
- Helitaanka xuquuqda socdaalka ee dhoofitaanka iyo kusoo noqoshada dalka Ireland si la mid ah muwaadiniinta Irishka (haddana sidaasoo ay tahay, waxaa lagu xasuusinayaa inay dhici karto in weli lagaaga baahdo qaadashada fiisaha dal-ku-galka ee waddan kale).
- Inaad Wasiirka u qoratid codsi muddo hal sano kadib marka aad qaadatid oggolaanshaha qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn, adigoo dalbanaya in oggolaansho la siiyo xubnaha qoyskaaga si ay usoo galaan isla mar ahaantaana ay kugula noolaadaan dalka Ireland.

**Qaabkee ayaan u dalban karaa dhukmintiga lagu socdaalo?**

**Waxaad codsi u qoran kartaa Wasiirka si aad u heshid dhukmintiga lagu socdaalo adigoo buuxinaya foomka codsiga ee loogu talo-galey. Sidoo kale waxaa lagaaga baahan yahay inaad bixisid lacag dhan €80. Wasiirku masoo saari doono dhukmintiga lagu socdaalo haddii qofka wax dalbanayaa uuna soo gudbin macluumaadka looga baahan yahay si loogu habeeyo codsigiisa, marka qofka wax dalbanaya uu haystomagangelyada qaxootinimada aan ahayn isla mar ahaantaana uu heli karo baasaboorka dalka ama haddii uu Wasiirku uu go'aansado in bixinta dhukmintiga lagu socdaalo ayna waafaqsaneyn nabadgelyada qaranka, nabadgelyada guud, caafimaadka guud, ama kala-danbeynta guud ama inay lid ku tahay siyaasadda guud.**

**Waxaan haystaa oggolaanshaha sii-joogitaanka. Ma awoodi karaa inaan codsado dhukmintiga lagu socdaalo?**

**Haddii aan lagu siinin oggolaanshaha qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn hase ahaatee lagu siiyey oggolaanshaha sii-joogitaanka Ireland, waxaa lagaa rabaa inaad safaaradda dalkaaga ka codsati baasaboor. Waxaa jira xaalado dhif ah oo khuseeya dad la siiyey oggolaanshaha sii-joogitaanka oo aan haysanin baasaboor kuwaasoo uu Wasiirka Cadaaladda iyo Garsoorku usoo saari karo dhukminti kale oo lagu socdaalo.**

Guud ahaan xuquuqda qaxootiga iyo faa'iidooyinka laga helo magangelyada qaxootinimada aan ahayn waa isku mid marka laga reebo inaan qofka qaxootigu lahayn xaq uu ku qaato dhukmintiga lagu socdaalo. Ka-faa'iideystaha magangelyada qaxootinimada aan ahayn wuxuu dhukmintiga lagu socdaalo ka qaadan karaa INIS-ta kaliya marka uu awoodi kari waayo inuu helo baasaboorka dalka uu asal ahaan u dhashay. Sidoo kale oggolaanshaha qaxootinimadu waa oggolaansho caalami ah oo la isla aqoonsan yahay sida ku cad Axdiga iyo Baratakoolka QM ee Arrimaha Qaxootiga ee soo baxay sannadki 1951. Sidoo kale qaxootigu waxay codsan karaa dhalashada Irishka sadex sano kadib halka kuwa haysta magangelyada qaxootinimada aan ahayn looga baahan yahay inay sugaan muddo shan sano ah.

Haddii laguu diido oggolaanshaha qaxootinimada iyo magangelyada qaxootinimada aan ahayn hase ahaatee lagu siiyo oggolaanshaha sii-jogitaanka, oggolaanshahani wuxuu noqonayaa mid waafaqasn Faqradda 4 ee Xeerka Socdaalka ee soo baxay 2004. Oggolaanshaha lagu siiyey waxaa laga yaabaa inuu leeyahay shuruudo gaar ah. Waxaa ka mid ah inta ay le'eg tahay muddada lagu siiyey oggolaanshaha in laguu oggol yahay inaad ku lug yeelatid shaqo, ganacsi ama xirfad Dalka dhexdiisa. Oggolaanshaha joogitaanka waa la cusbooneysiin karaa marka uu dhaco, haddana sidaasoo ay tahay, waxaa waqti kasta dib lo fiirin karaa inta ay le'eg tahay muddada lagu siiyey iyo shuruudaha weheliya.

Qofkii la siiyey oggolaanshaha joogitaanka xaq uma laha inay qoyskiisu la midoobaan sida ku qeexan Xeerka Magangelyada Caalamiga. Qofkaasi wuxuu awoodi karaa inuu codsado inay qoyskiisu la midoobaan isagoo maraya habraacyada socdaalka, haddana sidaasoo ay tahay, waxaa jira shuruudo iyo arrimo gaar ahaaneed oo la tixgelinayo.

### La-midoobitaanka qoyska

Haddii lagu siiyey baaqa caddeynta qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn, waxaad awoodi kartaa inaad muddo 12 bilood gudahood oo ka bilaabata waqtigii aad heshay baaqa caddeynta, Wasiirka ka dalbatid oggolaansho uu siiyo xubno gaar ah oo ka mid ah qoyskaaga si ay usoo galaan ama kuugula noolaadaan dalka Ireland, ama haddii ay horey usii joogeen dalka inay adiga halkan kugula noolaan karaan.

Kadib marka uu Wasiirku sameeyo baaritaan isla mar ahaantaana soo saaro go'aan, xubinka qoyska waxaa la siin doonaa oggolaansho uu ku degganaado dalka Ireland muddo kooban oo aan ka yareyn 1 sano, ama haddii ay tahay cusbooneysiin muddo aan ka yareyn 2 sano.

**Waa ayo cidda lagu qeexay inay tahay xubinka qoyska marka laga hadlayo mideynta qoyska?**

**Haddii aad tahay qofka wax dalbanaya oo qaan-gaar ah, xubnaha qoyskaaga waxaa lagu qeexay inay yihiin sida (i) lamaanahaaga ama bahwadaagtaada madanig, kaasoo aad is-qabteen ama aad ahaydeen bahwadaag markii aad dalbatay magangelyada caalamiga; (ii) ilmahaaga, inta ay da'doodu ka yar tahat 18 sano isla mar ahaantaana aan guursanin waqtigii aad dalbatay magangelyada caalamiga.**

**Waxaan ahay ilmo aan cidina wehelinin. Waa ayo xubnaha qoyskaygu ee ila midoobi kara?**

**Waalidiintaada iyo walaalahaaga wiilasha ah iyo kuwa gabdhaha ee ay da'doodu ka hooseyso 18 sano jir ee aan weli guursanin. Qoyskaaga waxaa la qeexayaa marka aad codsatid la-midoobitaanka qoyska.**

**Qaab noocee ah ayaan u dalban karaa la-midoobitaanka qoyska?**
**Isla marka lagu siiyo baaqa caddeynta qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn, waxaad dalban kartaa la-midoobitaanka qoyska, adiga oo qoraal u diraya Waaxda Mideynta Qoysaska ee Laanta Jinsiyadda iyo Socdaalka Ireland, 13/14 Burgh Quay, Dublin 2.**

### Habraaca loo marayo dib u midaynta qoyska

Waa inaad codsigaaga soo gudbisatid muddo 12 bilood kadib marka aad Wasiirka ka qaadatid baaqa oggolaanshaha qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn. Tusaale ahaan, haddii laguu soo saaray baaqa oggolaanshaha qaxootinimo markey tahayd 1[dii] Maarso 2017, waxaa laga rabaa inaad dalbatid mideynta qoyska kahor inta aan la gaarin Maarso 1, 2018.

Waa inaad qaab qoraal ah ugu soo gudbisid Waaxda Mideynta Qoysaska, ee INIS adigoo soo raacinaya macluumaadkan hoose:

- Magacaaga, lanbarka aqoonsigaaga shakhsi ahaaneed iyo ciwaankaaga;
- Taariikhda aad Wasiirka ka qaadatay oggolaanshaha qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn;
- Magacyadda qof-kasta oo ka mid ah qoyska, waxa aad isku tihiin, taariikhda dhalashada, jinsiyadda iyo ciwaanka waqti-xaadirkan.

Sidoo kale way fiican tahay inaad warqadda soo raacisid nuqul ka mid ah koobiga baaqa qaxootinimadaada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn. Codsigan kadib Xubinta Dib U Midaynta Qoysasku waxay kuusoo diri doontaa qaab su’aaleed aad buuxineysid. Marka lasoo gaaro marxaladdan, waxaa sidoo kale lagaa codsan doonaa inaad soo gudbisid nuqullada dhukmintiyada xubnaha qoyskaaga oo asal ah sida shahaadooyinkooda dhalashada, kaararka aqoonsiga dalka iyo baasabooradooda taasoo ay weheliyaan laba sawir oo waqti dhow la qaadey oo midab ah kuwaasoo saxiixan. Sidoo kale waxaa lagaaga baahan karaa inaad soo gudbisid dhukmintigaaga socdaalka si uu kuugu noqdo caddeyn muujineysa goobta aad waqti-xaadirkan deggan tahay. Iyadoo la tixgelinayo duruufahaaga shakhsi ahaaneed, waxaad sidoo kale awoodi kartaa inaad soo gudbisid shahaadada guurka haddii aad raadinayso dib ula midoobid ninkaaga ama xaaskaaga ama wixii macluumaad kale ee khuseeya ama caddayn rasmi ah.

Ka dib markaad buuxisid ee aad soo gudbisid qaab su’aaleedkaaga, Waaxda Dib u Midaynta Qoysasku waxay baaritaan ku sameyn doontaa dalabkaaga kadibna waxaa laguu soo diri doonaa warqadda go’aanka. Haddii la oggolaado dib u midaynta qoyskaaga waxaa laguu soo diri doonaa warqad ay ku qoran tahay go’aanka oggolaanshaha, taariikhda loo baahan yahay in xubinka qoyskaagu (xubnaha qoyskaagu) ay kusoo galaan dalka iyo/ama inay kusoo degaan Dalka. Waa muhiim inaad u diyaariso socdaalkooda kahor taariikhdaas ahaan sidii haddii ayna xubinta(ha) qoyskaagu aanay soogali Ireland kahor ama isla taariikhdaas, markaana oggolaanshaha dib u midwoga qoyska ayaa noqonaya wax kama soo qaad.

**Waxaan ahay xubin ka mid ah qoys oo waqti dhow qaatay oggolaansha aan kula midoobi karo qoyskayga oo ku nool dalka Ireland. Maxay tahay xuquuqdeydu?**

**Waxaad haysataa oggolansho aad kusoo geli kartid iyo/ama ku noolaan kartid dalka Ireland muddo aan ka yareyn hal sano, iyo muddo laba sano ah haddii laguu cusboneysiinayo. Haddii aad tahay xubin ka mid ah qoyska, waxaad leedahay dhammaan wixii xuquuq ah ee uu leeyahay qofka kuusoo dacwooday, waase haddii magangelyada caalamiga ee qofka kuusoo dacwooday ay tahay mid shaqeyneysa isla mar ahaantaana aad tahay qof ku nool Dalka gudihiisa.**

# 6 Qodobo Kumeel-gaar ah

Dadka qaarkood waxay dalbadeen magangelyada caalamiga kahor intii aan lasoo saarin Xeerka Magangelyada Caalamiga 31ki Diseembar 2016. Waxaa la sameeyey hawlo isku-dubarid oo gaar ah si kiisaska dadkaas looga soo wareejiyo Xafiiska Wakiilka Codsiyada Qaxootiga (ORAC) iyo weliba rafcaano gaar ah oo laga soo wareejinayo Maxkamadda Rafcaanada Qaxootiga (RAT) kuwaasoo loosoo wareejinayo Xafiiska cusub ee Magangelyada Caalamiga. Codsadayaashani waa inay Xafiiska Magangelyada Caalamiga ka qaataan warqad shakhsi ah oo loogu sharxayo isku-dubaridka wareejinta codsiyadooda.

Jaantusyada hoosta ku yaal ayaa muujinaya heerarka ugu muhiimsan ee ay u qeybsan yihiin kiisaska loosoo wareejiyey Xafiiska Magangelyada Caalamiga. Waxa muhiim ah in fiiro gaar ah loo yeesho in sanduuqyada dhinaca bidix ay muujinayaan codsiyadii lasoo gudbiyey kahor 31kii Diseembar 2016. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa **Isku-dubaridka macluumaadka ku meelgaarka ee Xafiiska Magangelyada Caalamiga:** http://ipo.gov.ie/en/IPO/Pages/Transitional_Arrangements Fadlan la tasho qareenkaaga haddii aad u baahan tahay talo-bixin dheeraad oo la xiriirta codsigaaga.

**Kahor 31kii diseembar 2016 ayaan Xafiiska Wakiilka codsiyada Qaxootiga ka dalbadey qaxootinimo mana aanan helin wax go'aan ah oo ku saabsan kiiskeyga**

**Faylkaaga waxaa loo wareejin doonaa Xafiiska Magangelyada Caalamiga si uu qiimeyn ugu sameeyo baahiyahaaga la xiriira magangelyo caalami ah. Taasoo ay macnaheedu tahay inaad buuxin doontid qaab su'aaleed cusub kadibna waxaa lagula yee-lan doonaa wareysi cusub iyadoo la marayo habraaca kali ah.**

**Codsigeyga qaxootinimadu wuxuu gaarey Maxkamadda Rafcaanka Qaxootiga kahor 31kii Diseembar 2016 Hase ahaatee ma aanan helin go'aankii Maxkamadda Rafcaanka.**

**Faylkaaga waxaa loosoo wareejin doonaa Xafiiska Magangelyada Caalamiga si looga baaraan-dego inaad xaq u leedahay magangelyada qaxootinimada aan ahayn oo kaliya. Waxaa kale oo aad qaadan doontaa qaab su'aaleed cusub iyo wareysi la xiriira magangelyada qaxootinimada aan ahayn oo kaliya. Haddii Xafiiska Magangelyada Caalamigu diido codsigaaga la xiriira magangelyada qaxootinimada aan ahayn, Wasiirka ayaa ka fiirsan doona haddii aad xaq u leedahay in lagu siiyo oggolaanshaha sii-joogitaanka. Haddii aad rafcaan ka qaadaneysid diidmo la xiriirta magangelyada qaxootinimada aan ahayn, rafcaankaaga waa inuu la socdo rafcaankii aad ka qaadatay oggolaanshaha qaxootinimada kaasoo aad horey u haysatay si ay suurtagal u noqoto in go'aan laga qaato labada rafcaanba tusaale sida,. oggolaanshaha qaxootinimada iyo magangelyada qaxootinimada aan ahayn.**

**Xafiiska Wakiilka Codsiyada Qaxootiga ayaan ka dalbadey magangelyada qaxootinimada aan ahayn kahor 31kii Diseembar 2016 hase ahaate ma jiro wax baaritaan oo weli lagu sameeyey codsigeyga.**

**Faylkaaga waxaa loosoo wareejin doonaa Xafiiska Magangelyada Caalamiga si looga baaraan-dego inaad xaq u leedahay magangelyada qaxootinimada aan ahayn oo kaliya. Waxaa kale oo aad qaadan doontaa qaab su'aaleed cusub iyo wareysi la xiriira magangelyada qaxootinimada aan ahayn oo kaliya. Go'aankii kasoo baxay Xafiiska Wakiilka Codsiyada Qaxootiga iyo Maxkamadda Rafcaanka Qaxootiga ee laguugu diiday oggolaanshaha qaxootinimadu sidiisii ayuu ahaanayaa (haddii uu khuseeyo kiiskaaga). Haddii Xafiiska Magangelyada Caalamigu diido codsigaaga la xiriira magangelyada qaxootinimada aan ahayn, Wasiirka ayaa ka fiirsan doona haddii aad xaq u leedahay in lagu siiyo oggolaanshaha sii-joogitaanka. Sidoo kale waxaad awoodi kartaa inaad rafcaan ka qaadatid diidmada magangelyada qaxootinimada aan ahayn ee uu ku siiyey Xafiiska Magangelyada Caalamigu adigoo rafcaanka u guddbinaya Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga.**

**Kahor 31kii Diseembar 2016 ayaan Maxkamadda Rafcaanka Qaxootiga u gudbiyey rafcaan la xiriuira dalabkeyga magangelyada qaxootinimada aan ahayn. Maxaa ku dhici doona codsigeyga?**

**Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga oo lagu baddalay Maxkamadda Rafcaanka Qaxootiga, waxay go'aan ka gaari doontaa rafcaanka la xiriira magangelyada qaxootinimada aan ahayn oo kaliya. Kadibna waxaad xaq u yeelayneysaa inaad qaab qoraal ah Wasiirka Garsoorka iyo Cadaaladda uga soo dalbatid "fasaxa sii-joogitaanka" sida ku cad faqradda s.3 ee Xeerka Socdaalka 1999. Arrimaha loo cuskanayo go'aanada noocan ah waa kuwo dhinacyada qaarkod kaga duwan waxyaabaha la tixgelinayo ee khuseeya "oggolaanshaha sii-joogitaanka" sida ku qeexan Xeerka Magangelyada Caalamiga 2015. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan la hadal wakiilkaaga dhinaca sharciga.**

**Maxkamadda Rafcaanka Qaxootiga ayaan u gudbistay rafcaan la xiriira Shuruucda Dublin kahor 31kii Diseembar 2016. Maxaa ku dhici doona codsigeyga?**

**Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga oo lagu baddalay Maxkamaddii Rafcaanka Qaxootiga ayaa go'aan ka qaadaneysa wixii rafcaan ah ee khuseeya Shuruucda Dublin oo kaliya. Haddii rafcaankaagu noqdo mid guuleysta markaa kadib codsigaaga waa laga oggolaanayaa dalka Ireland iyadoo la marayo habraacyada caadiga ah.**

## 7 Su'aalaha la is-weydiiyo Inta badan:

**S** Waa maxay magangelyo caalami ah?

**J** Magangelyada caalamigu waa erey si guud looga adeegsado shuruucda Midowga Yurub kaasoo loola jeedo qaxootiga iyo xaaladaha magangelyada qaxootinimada aan ahayn. Qofka ku sugan dalka Ireland gudihiisa ee sheegta inuu yahay magangelyo-doon waa mid dalbanaya magangelyo caalami ah isagoo ka cabanaya inuu kasoo cararay dhibaato ama waxyeello daran oo uu kula kulmay dalkiisii hooyo.

**S** Ayaa qaxooti ah?

**J** Qaxootigu waa qof aan ku laaban karin dalkiisii sababtoo ah iyadoo ay jirto cabsi la hubo oo la xiriirta in loo dhibaateeyo sababo la xiriira isir, diin, jinsiyad, xubinimada koox bulsheed gaar ah ama fikir siyaasadeed.

Oggolaanshaha qaxootinimadu waa qaab magangelyo oo la siiyo dadka uu ku dabbaqmayo ereyga qaxooti.

**S** Maxay tahay magangelyada qaxootinimada aan ahayn?

**J** Magangelyada qaxootinimada aan ahayn waxay dheellitir u tahay oggolaanshaha qaxootinimada. Waxaa loola jeedaa qof aan dib ugu laaban karin dalkiisii uu u dhashay ama dalka uu deegaanka ku leeyahay sababtuna ay tahay inuu wajahayo khatar dhab ah oo la xiriirta in loo geysto dhibaato daran. Dhibaato daran waxaa loola jeedaa (i) ciqaabta dilka ama toogashada iyo qoorgoynta iwm.; (ii) jirdil ama bahdilitaan ama macaamil xaqiraad ah ama ciqaab leh; (iii) hanjabaad dhab ah iyo mid shakhsi ahaaneed oo lagula kaco nolosha madaniga ama qof taasoo ka dhalatay fal xadgudub gacan-u-qaad oo aan cidna lo aaba-yeelaynin xaaladaha colaadaha caalamiga iyo kuwa maxalliga ee hubeysan.

**S** Waa maxay oggolaanshaha aad ku joogtid?

**J** Oggolaanshaha sii-joogitaanka waxaa qiimeyn lagu sameyn karaa oo kaliya marka la ogaado inaadan xaq u lahayn oggolaansho qaxootinimo ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn. Markay xaaladan sidan oo kale tahay Wasiirka ayaa ka fiirsanaya in lagu siiyo oggolaanshaha aad ku joogtid Ireland iyadoo lagu saleynayo inay jirto sabab kale sida qoyskaaga ama duruufahaaga shakhsi ahaaneed.

Wasiirku wuxuu fiiro gaar ah u yeelan doonaa arrimo ay ka mid tahay:

a. nooca xiriirkaaga dalka Ireland, haddii uu jiro wax xiriir ahi;
b. arrimo la xiriira dhinaca bani'aadminimada:
c. dabeecadaada iyo hab-dhaqankaaga intii aad joogtay goob ka baxsan Ireland ama muddadii aad ku sugnayd Ireland gudaheeda, taasoo ay ku jiraan eedeymo la xiriira fal-danbiyeedyo;
d. tixgelinta wanaagsanaanta guud.

Marka uu Wasiirku ka fikirayo qaadashada go'aanka oggolaanshaha aad ku joogtid wuxuu sidoo kale fiiro gaar ah u yeelan doonaa inay mamnuuc tahay in qofka si qasab ah dalkiisii loogu celiyo.

**S** Maxaa loola jeedaa mamnuucitaanka dib-u-celinta qasabka ah?

**J** Mabda'an waxaa loola jeedaa in Wasiirku uuna si qasab ah u eryi karin ama u celin karin qofna xuduudaha dalka, si kasta oo ay ahaataba, haddii ay wasiirka ula muuqato in (a) nolosha ama xorriyadda qofkuba ay la kulmi karaan hanjabaad la xiriirta isirka qofka, diintiisa, jinsiyadda, xubin ka ahaanshaha koox bulsheed gaar ah ama fikir siyaasadeed ama (b) inay jirto khatar dhab ah oo uu qofku la kulmayo ciqaabta dilitaanka, jirdilka ama habdhaqan kale oo ka baxsan bani'aadminimada ama bahdilaad ama ciqaab.

**S** Maxaa loola jeedaa "oggolaanshaha sii-joogitaanka"?

**J** Oggolaanshaha sii-joogitaanka waxaa loola jeeda habraacii ka horreeyey intii aan la hirgelinin Xeerka Nabadgelyada Caalamiga ee soo baxay 2015. Qodobka.3 ee xeerka socdaalka ee soo baxay 1999 waxaa ku qeexan arrimaha uu Wasiirku tixgelin gaar ah siinayo marka uu qaadanayo go'aanka oggolaanshaha aad ku joogtid. Qodobadu waxay sidoo kale ku dabbaqmayaan kiisaska shakhsiyaadka la go'aamiyey in dib loo tarxiilo kuwaasoo aan horey u dalbanin magangelyo. Tiro yar oo ka mid ah kiisaska kumeel-gaarka (fiiri qeybaha sare) ayaa sii wadan doona in la mariyo habraacyadan.

**S** Maxaa loola jeedaa inuu qofku ku tiirsan yahay sheegashada waalidka ee magangelyo caalami ah?

**J** Waxaa loola jeedaa in si mideysan loo qiimeyn doono codsiga qofka carruurta ah ee la xiriira magangelyada caalamiga ah iyo sheegashada waalidkiis isla mar ahaantaana ay natiijadu ku xirnaan doonto qiimeynta kiiska waalidka.  Ilmaha mas'uulka laga yahay lalama yeelanayo wareysi gaar ah ama qiimeyn gaar ahaaneed oo ku saabsan baahiyihiisa/baahiyaheeda la xiriira magangelyada. Waalidka

ayaa looga baahan yahay inuu codsigiisa ku sheego sababaha uu ilmaha yari ugu baahan yahay magangelyo caalami ah iyo/ama sababaha loogu baahan yahay in ilmaha yar la siiyo oggolaanshaha joogitaanka Ireland. Waxaa muhiim ah in la xasuusnaado inay suurtagal tahay inuu ilmaha yar leeyahay baahiyo gaar ahaaneed oo ka duwan kuwa waalidka oo la xiriira magangelyada caalamiga.

**S** Ma ka codsan karaa magangelyo caalami ah gudaha Ireland haddii aan ahay qof bilaa-dowlad ah?

**J** Haa, waad ka codsan kartaa dalka Ireland oggolaanshaha qaxootinimada iyo magangelyada qaxootinimada aan ahayn haddii aad tahay bilaa-dowlad. Kadibna waxaa qiimeyn lagu sameyn doonaa codsigaaga iyadoo laga fiirinayo dalka aad deegaanka ku leedahay tusaale,. dalkii aad markii hore ku noolaan jirtay.

**S** Ka warran haddii aan ahay qof naafo ah iyo/ama ay jiraan baahiyo gaar ahaaneed oo aan qabo?

**J** Waxaa lagaa rabaa inaad Xafiiska Magangelyada Caalamiga si deg-eg ah ugu wargelisid wixii naafoimo ama baahiyo kale oo gaar ahaaneed oo aad qabtid inta lagu jiro waqtiga wareysigaaga shakhsiga ah si ay Xafiiska Magangelyada Caalamiga ugu suurtagasho inay maareeyaan baahidaada haddii ay suurtagal tahay.

**S** Suurtagal ma tahay in la igala noqdo baaqa caddeynta qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn?

**J** Haa, waxaa jira duruufo xaddidan oo gaar ahaaneed kuwaasoo suurtagelinaya in lagaala noqdo baaqa caddeynta qaxootinimada ama magangelyada qaxootinimada aan ahayn sida haddii la ogaado inaad soo gudbisay macluumaad been ah ama macluumaad jaha-wareerin ah intii lagu jiray qiimeynta codsigaaga magangelyada caalamiga. Haddii ay sidaasi dhacdo waxaa laguu soo diri doonaa ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan talo-soojeedinta Wasiirka ee ku aaddan in lagaala noqdo caddeynta aad haysatid iyadoo la qeexayo sababaha loo cuskanayo. Waxaa lagu siin doonaa fursad si aad Wasiirka ugu soo gudbisid fikradda aad qabtid oo qoraal ah muddo 15 maalmood gudahood oo ka bilaabaneysa waqtigii lagu siiyey ogeysiiska. Isla markii uu Wasiirku go'aansado in lagaala noqdo oggolaanshaha, waxaad awoodi kartaa inaad muddo 10 maalmood oo shaqo gudahood rafcaan lid ku ah go'aankaas ugu gudbisatid maxkamadda lagu magacaabo Circuit Court.

**S** Halkee ayaan ku noolaan doonaa inta lagu jiro habraaca magangelyada caalamiga?

**J** Wakaaladda Soo-dhoweynta iyo Is-dhexgalka ayaa goob deegaan kaa siin doonta xarunta lagu magacaabo Direct Provision, haddana sidaasoo ay tahay haddii aad haysatid wax dhaqaale oo adiga kuu gaar ah, waxaad xor u tahay inaad ku noolaatid meel-kasta. Nidaamka Soo-dhoweynta waxa xukuma S.I. Lam. 230 Xeerarka Bulshada Yurub (Xaaladaha Soo-dhoweynta) ee 2018.

## BIXINTA OGGOLAANSHAHA QAXOOTINIMADA EE XAALADDA 1 AAD

**Codsiga Magangelyada Caalamiga**

Baaritaanka & talo-u-soo-jeedinta Xafiiska Magangelyada Caalamiga

Oggolaansho qaxootinimo ayaa lagu talinayaa

Wasiirku wuxuu soo saari doonaa baaqa Oggolaanta Qaxootinimada haddii uuna codsaduhu wax khatar ah u keeni karin nabadgelyada qaranka

## BIXINTA MAGANGELYADA QAXOOTINIMADA AAN AHAYN EE XAALADDA 1AAD

**Codsiga Magangelyada Caalamiga**

Baaritaanka & talo-u-soo-jeedinta Xafiiska Magangelyada Caalamiga

Magangelyada qaxootinimada aan ahayn laakiin laguma talin oggolaan qaxootinimo

Wasiirku wuxuu soo saari doonaa Baaqa Magangelyada Mqaamkeedu hooseeyo


Racfaanka la xiriira Oggolaanshaha Qaxootiga waxaa laga heli karaa oo kaliya Maxkamadda Rafcaanka Magangelyada Caalamiga

Rafcaan aan lagu guuleysanin: Baaqa magangelyada qaxootinimada aan ahayn wuu shaqeynayaa


Rafcaan lagu guuleystay

Wasiirku wuxuu soo saari doonaa baaqa Oggolaanshaha Qaxootiga haddii uuna qofka dalbaduhu khatar ku ahayn nabadgelyada qaranka. Baaqa magangelyada qaxootinimada aan ahayn wuxuu noqonayaa mid lagu dhaqmo oo hirgelaya

## BIXINTA OGGOLAANSHASHA JOOGITAANKA EE XAALADDA 1AAD



# DIIDMADA OGGOLAANSHAHA QAXOOTINIMADA,MAGANGELYADA MAQAAMKEEDU HOOSEEYO IYO DIIDMADA SII-JOOGITAANKA EE XAALADDA 1AAD



# 8 MACLUUMAAD FAAH-FAAHSAN OO LA XIRIIRA HAY'ADAHA IYO LAAMAHA AY SHAQADU KHUSEYSO

**Weli miyey jiraan wax su'aalo ah oo aad ka qabtid habraaca gaarka ah ee cusub ee la marayo ama Xeerka Magangelyada Caalamiga kadib markii aad akhrisatay buug-yarahan?**

Waxaad awoodi kartaa inaad la xiriirtid xafiiskeena iyo/ama aad weydiisid qareenkaaga.

**International Protection Office Irish Naturalisation & Immigration Service**
79-83 Lower Mount Street,
Dublin 2, D02 ND99
**Tel:** +353 1 602 8000
**Faaks:** +353 1 602 8122
**Iimayl:** ipo@justice.ie
www.ipo.gov.ie

**International Protection Appeals Tribunal**
6/7 Hanover Street,
Dublin 2, D02 W320
**Tel:** +353 1 474 8400
**Lo-Call:** 1890 210 458
**Faaks:** +353 1 474 8410
**Iimayl:** info@protectionappeals.ie
www.protectionappeals.ie

**Irish Naturalisation & Immigration Service**
Department of Justice & Equality
13-14 Burgh Quay,
Dublin 2, D02 XK70
**Tel:** +353 1 616 7700
**Lo-Call:** 1890 551 500
www.inis.gov.ie

**Reception and Integration Agency**
P.O. Box 11487, Dublin 2
**Tel:** +353 1 418 3200
**Faaks:** +353 1 418 3271
**Iimayl:** RIA_Inbox@justice.ie
www.ria.gov.ie

**International Organisation for Migration**
116 Lower Baggot Street,
Dublin 2, D02 R252
**Tel:** +353 1 676 0655
**Telefoon Bilaash ah:** 1800 406 406
**Iimayl:** iomdublin@iom.int
www.ireland.iom.int

**Legal Aid Board Dublin**
48/49 North Brunswick Street,
Georges Lane, Dublin 7
D07 PE0C
**Tel:** +353 1 646 9600
**Faaks:** +353 1 671 0200
**Iimayl:** lawcentresmithfield@legalaidboard.ie

**Legal Aid Board Galway**
9 Francis Street Galway,
H91 NS53
**Tel:** +353 91 561 650
**Faaks:** +353 91 563 825
**Iimayl:** galwaylawcentre@legalaidboard.ie

**Legal Aid Board Galway**
Popes Quay Law Centre,
North Quay House,
Popes Quay, Shandon,
Cork, T23 HV26
**Tel:** +353 21 4551 686
**Faaks:** +353 21 455 1690
**Iimayl:** lawcentrecorknorth@legalaidboard.ie

**Team for Separated Children Seeking Asylum, Tusla - Child & Family Agency**
Sir Patrick Dun's Hospital,
Lower Grand Canal Street,
Dublin 2, D02 P667
**Tel:** +353 1 647 7000
**Faaks:** +353 1 647 7008
www.tusla.ie

**Irish Refugee Council**
37 Killarney Street,
Mountjoy, Dublin 1
**Tel:** +353 1 764 854
**Faaks:** +353 1 672 5927
**Iimayl:** info@irishrefugeecouncil.ie
www.irishrefugeecouncil.ie

**Nasc Ireland**
Ferry Lane, Dominic Street, Cork
**Tel:** +353 21 450 3462
**Iimayl:** info@nascireland.org
www.nascireland.org

**Doras Luimni**
Central Buildings 51a,
O' Connell Street,
Limerick, V94 268W
**Tel:** +353 61 310 328
**Iimayl:** info@dorasluimni.org
www.dorasluimni.org

**Crosscare Refugee Service**
2 Sackville Place, Dublin 1
**Tel:** +353 1 873 2844
**Faaks:** +353 1 872 7003
**Iimayl:** refugeeservice@crosscare.ie
www.crosscare.ie

**SPIRASI**
213 North Circular Road,
Phibsborough, Dublin 7
**Tel:** +353 1 838 9664
ama +353 1 868 3504
**Faaks:** +353 1 882 3547
**Iimayl:** info@spirasi.ie
www.spirasi.ie

**Jesuit Refugee Service Ireland**
The Mews, 20 Upper Gardiner St.
Dublin 1.
**Tel:** +353 1 814 8644
www.jrs.ie

**UNHCR**
102 Pembroke Road,
Ballsbridge, Dublin 4,
Ireland.
**Tel:** + 353 1 6314510
**Iimayl:** iredu@unhcr.org
www.unhcr.ie

www.unhcr.ie

UNHCR
The UN Refugee Agency